Daryeelkaaga, waddada aad u dooratid

Waxaa Is beddel lagu samaynayaa daryeelka bulsho ee dadka waawayn si aad u heshid xornimo, doorashooyin iyo is-xukumid dheeraad ah oo la xiriirta habka aad daryeelka iyo taageerooyinka u heshid.

Adeegyada mustaqbalku waxay ku siin doonaan doorashooyin iyo is-xukumid dheeraad ah oo ku saabsan daryeelka iyo taageerada aad heshid. Degmada, Adeegga Caafimaadka Qaranka (NHS) iyo ururrada degaankuba waxay ka wada shaqeynayaan sidii qof kasta loo dhegeysan lahaa oo taageero loogu fidin lahaa. Macluumaadka hagaagsan iyo talooyinkuba waxay kaa caawin doonaan inaad heshid adeegyada aad u baahan tahay.

Haddii aad xaq u yeelatid taageerada joogtada ah, adiga ayaa taageeradaas qorshaysan doonaa. Waxaad dooran kartaa inaad qaadatid lacag loo yaqaan miisaaniyadda gaarka ah, si aad kharashka adeegyada isaga bixisid.
Sida qorshahayagu yahay, adeeggaan cusub waxaan bixin doonaa bartamaha 2010.

Buug-yarahaani wuxuu kaa caawinayaa sidii aad is beddeladaas u fahmi lahayd iyo sida laga yaabo in is beddelladaasi ay kuu saameeyaan.

Sida uu nidaamku u shaqayn doono

1. Degmada ayaad la xiriiraysaa. Waxaan ka wada hadli doonaa baahiyaha aad qaabtid si aan u fiirinno inaad xaq u leedahay taageerada joogtada ah iyo in kale.
2. Haddii aadan taageeradaas xaq u yeelan waxaan kugu xiri doonaa ururrada degmada ka jira, adeegyada kale ee Degmada ama Adeegga Caafimaadka Qaranka (NHS) si ay kuu siiyaan taageerada kugu haboon ee kaa caawinaysa hagaajinta tayada noloshaada.
3. Haddii aad taageerada xaq u yeelatid, waxaan ku siin doonaa kooras gaaban oo taageero ah. Koorasku wuxuu noqon karaa baxnaanin ama jir-duugis. Intaas ka dib waxaan dib-u-eegis ku samynaynaa horumarka aad samaysay si aan u fiirinno in baahiyahaagii ay is beddeleen iyo in kale. Waxaa dhici kara inaadan taageero dambe oo joogto ah u baahan.
4. Haddii aan aragno inaad taageero joogto ah u baahan tahay, baahiyahaaga ayaan dib-u-qiimeyn ku samayn doonaa annagoo adiga kaala tashanayna.
5. Dib-u-qiimeyntaani waxay fikrad naga siinaysaa kharashka aad u baahanaysid si aad markaas u dooratid adeegyada aad u baahan tahay. Waxay kaloo qiimeyntu noo sheegaysaa haddii ay jiraan kharash daryeel oo ay tahay inaad adigu iska bixisid. Adeegyada aad dooranaysid waa inay noqdaan adeegyo aad is leedahay nolshaada wax wayn bay ka beddelayaan.

6. intaas ka dib waxaad diyaarinaysaa qorshaha gargaarka aad u baahan tahay. Annaga ayaa arrimahaan kaa taageeri karna, sidoo kale qoyskaaga iyo asxaabtaaduba way ku caawin karaan.
7. qorshaha aad wadatid waa inaan annaga iyo adigu ku heshiinaa.
8. markaas ayaad ku soconaysaa qorshihii aad degsatay. Dib-u-eegis joogto ah ayaan horumarkaaga ku samayn doonaa, haddii loo baahdana qorshahaaga iyo miisaaniyadaadaba waxbaa laga beddelayaa.

Sidee ayay arrimahaani u shaqayn doonaan?

Qaybta soo socota waxaad ka helaysaa macluumaad ku saabsan:

- Yaa xaq u leh taageerada joogtada ah
- Maxaa dhacaya haddii aad xaq u yeelan weydid
- Miisaaniyadda gaarka ah iyo qorshaha daryeelka iyo gargaarka
- Sugidda ammaanka
- Maxaa dhacaya haddii aad daryeeshid qof isagu gargaar joogto ah u baahan
- Sidee ayaad macluumaad dheeraad ah ku heli kartaa.

Yaa xaq u leh taageerada joogtada ah
Qof kasta oo 18 sano ka wayn oo buuxiya shuruudaha xaq u yeelashada.

Waxaad shuruudaha xaq u yeelashada ka daalacan kartaa www.hackey.gov.uk/adults-and-older-people.htm.

Maxaa dhacaya haddii aan xaq u yeelan waayo?
Qof kasta oo isu arka inuu daryeel iyo taageero u baahan yahay waa la dhegeysanayaa, gargaarna waa loo fidinayaa. Haddii aad daryeelka xaq u yeelan weydid waxaan kugu xireynaa waaxaha kale ee Degmada, Adeegga Caafimaadka Qaranka (NHS) ama ururrada degmada ka jira si aad u heshid adeegyada iyo macluumaadka kugu haboon.

Waxaan hadda la shaqaynaa Adeegga Caafimaadka Qaranka (NHS), dadweynaha degmada deggan iyo weliba ururrada degmada ka jira. Waxaan sidaa u samaynaynaa si aan u taabbagelino in dhammaan adeegyada daryeelku ay si fiican u wada shaqeeyaan oo macluumaadka dhib yari lagu helo arrintaasoo kaa caawinaysa inaad samaysid doorashada ugu fiican ee aad noloshaada ku hagaajinaysid.

Waxaa suurogal ah inaad door bidaysid urur meel gaar ah ku yaal ama mid fahmi kara baahiyahaaga dhaqameed. Waxaad kaloo ka faaiideysan kartaa baxnaaninta, jir-duugista ama adeegyada kale ee ay Degmada Hackney bixiso si caafimaadkaaga iyo baraarahaga kor loogu qaado. Diyaarinta waxyaabahaan oo dhan waan kaa caawin karnaa.

Maxaa dhacaya haddii aan u baahdo taageero joogto ah?
Haddii aad xaq u yeelatid taageerada joogtada ah adiga ayaa qorshahaaga daryeel iyo taageeraba diyaarsan kara adiga oo ku salaynaya waxyaabaha

aad is leedahay tayada noloshaada ayay kor u qaadayaan. Waxaa lagu siin doonaa miisaaniyadda aad xaqa u leedahay si aad ugu bixisid adeegyada laguu qabto. Arrimahaan oo dhan adiga ayaa diyaarsan kara ama, haddii aad doontid, qaar miisaaniyadaada ka mid ah ayaad Degmada ama dullaal kale oo madaxbannaan siin karta si ay arrimahaas oo dhan kuugu diyaariyaan.

Haddii daryeelkaani uusan kaagii ahayn, annaga ayaa kuu diyaarin doona dhammaan taageerooyinka aad u baahan tahay annagoo isticmaalayna adeegyada Degmada ee aan haddaba isticmaalno. Waxaad kaloo dooran kartaa xirmo isku-dhaf ah oo isugu jira adeegyo ay Degmada kuu fidiso iyo taageero aad adigu diyaarsato.

Waa maxay miisaaniyadda gaarka ahi?
Waa lacag aad u isticmaali karto inaad ku gadato adeegyada aad is leedahay waxay kor u qaadayaan tayada noloshaada.

Waa maxay qorshaha daryeelka iyo taageeradu?
Qorshaha daryeelka iyo taageeradu waa qorshe baahidaada lagu daboolayo oo gacan looga geysanayo sidii aad nolol madaxbannaan ugu noolaan lahayd. Qorshuhu wuxuu ka kooban yahay:

- Waxyaabaha muhiimka kuu ah iyo himilooyinkaaga oo dhan
- Daryeelka iyo taageerada aad u baahan tahay si kor loogu qaado caafimaadkaaga iyo nolshaada guudba iyo ciddii adeegyadaas kuu fulin lahayd
- Muddo intee le’eg ayay soconayaan daryeelka iyo taageerada aad u baahan tahay
- Sida ay Degmadu ula soconayso oo dib ugu eegayso qorshahaaga daryeel iyo taageero iyo weliba saamaynta ay taageeradaasi naftaada ku yeelanayso
- Lacagta ay taageradu ku kacayso iyo sida aad u maamulaysid miisaaniyadaada gaarka ah

Qorshahaaga waa in adiga iyo Degmadu aad isla oggolaataan.

Maxaa dhacaya haddii baahiyahaygu ay is beddelaan ama taageeradu ay waxba tari weydo?
Si joogto ah ayaan arrimaha qorshaha ku saabsan kaagala hadli doonaa si aan u ogaanno in taageeradu ay wax kuu tartay iyo in kale. Arrintaan waxaan u naqaan dib-u-eegis. Haddii himilada aad hiigsanayso ay is beddesho, waxaa suurogal ah in taageerada aad heshaana ay sidoo kale is beddesho. Dib-u-eegista ayaad noogu sheegi kartaa in taageeradu aysan waxba kuu tarin. Markaa ka dib ayaan ka wada hadli doonaa is beddellada loo baahan yahay in la sameeyo si gacan laguugu fidiyo.

Kharash daryeel ma la iiga baahan doonaa haddii aan u baahdo taageero joogto ah?
Waa suurogal in kharash lagaaga baahdo iyadoo arrintaasi ay ku xiran tahay heerka dakhligaagu gaarsiisan yahay. Waxaan leennahay siyaasad kharash macquul ah oo loogu talogalay adeegayada daryeelka bulshada. Marka la qiimeynayo kharashka lagugu dallacayo waxaa la raacayaa nidaamka u

degsan Waaxda Caafimaadka iyo Hagidda ku Darsiga Macquulka ah. Kharashka laga yaabo in lagaaga baahdo waxaa laguu sheegi doonaa ka hor inta aadan diyaarin qorshahaaga daryeelka iyo taageerada.

Sidee ayaan kharashka daryeelka u bixin doonaa?
Haddii aad dooratid in miisaaniyaddaada gaarka ah si toos ah laguugu soo shubo, sida caadiga ah inta aan lacagta laguu soo dirin ayaa wixii kharash ah laga reebayaa. Haddii aad dooratid in Degmadu adeegga kuu diyaariso oo bixiso qayb ama dhammaan kharashka adeegga ah, waxaa laguu soo diri doonaa bayaan bille ah oo laguugu sheegayo kharashka ay tahay in la bixiyo.

Immisa ayay noqonaysaa miisaaniyaddayda gaarka ahi?
Lacagta aad heli doontid waxay ku xirnaan doontaa inta ay le'eg yihiin daryeelka iyo taageerada aad u baahan tahay iyo kharashka daryeel ee ay tahay inaad bixisid. Qiimeynta ka dib ayaad fikrad ka qaadan doontaa inta ay lacagtaasi noqon doonto.

Lacagta aan helayo ma inaan kaligey maamulaa?
Maya. Waxaad taageero weydiisan kartaa qoyskaaga, saaxiibadaa ama dad aqoonyahanno ah oo kale si loo xaqiijiyo inaad heshid daryeelka kugu haboon.

Sidee ayaan u kharash garaynayaa miisaaniyaddayda gaarka ah?
Lacagtaada siyaabo badan ayaad u bixin kartaa. Waxaana ka mid ah:

- Inaad ku shaqaaleysid qof kuu gargaara. Qofkaasu wuxuu noqon karaa saaxiibkaa ama qof qoyskaaga ka tirsan. Hase yeeshee laguuma oggola inaad shaqaaleysid qof qoyska ka tirsan oo guriga kugula nool
- Inaad adeegyo kaga gadatid urur ama wakiil jira
- Inaad qalab gaar ah ku gadatid
- Inaad ku bixisid kharashka tababarka, ciyaaraha fudud ama kulammada bulshada

Waxaa jira waxyaabo aan lacagta lagu kharsh garayn karin, sida:

- Inaad siisid qof laga yaabo inuu halis kuu keeno
- Inaad ku bixisid adeegyada aan kaa caawinayn inaad ka soo fiicnaatid sida aad hadda tahay ama kuwa aan kor u qaadayn tayada noloshaada
- Inaad ku bixisid adeegyo aan ka mid ahayn qorshaha lagugu taageerayo
- Inaad ku bixisid alaabada guriga sida cuntada iyo dharka
- Iyo wax kasta oo sharciga khilaafsan

Ma heli doonaa lacag ka badan tan aan hadda qaato?
Maya. Ma heli doontid lacag ka badan lacagta aad horay u qaadan jirtay. Waxaa is beddelaya qaabka lacagta loo kharash gareynayo.

Ma haysan doonaa lacagta aanan meelna ku kharash garayn?
Maya. Lacagta waa in lagu bixiyaa meelihii lagu sheegay qorshahaaga daryeelka iyo taageerada. Wixii lacag ah oo aan la kharash garayn waa in la soo celiyaa.

Maxaa dhacaya haddii lacagta lagu bixiyo meel aan loogu talogelin?
Dib ayaan u soo ceshan doonaa lacagta noocaas ah.

Sidee ayay degmadu u kala ogaanaysaa inaan sidii loogu talogalay lacagta u isticmaalayo iyo in kale?
Qorshahaaga daryeelka iyo taageerada ayay ku caddahay sida aad lacagta u isticmaaleysid. Dib-u-eegis ayaanu ku samayn doonaa sida howluhu u socdaan iyo sida aad lacagta u kharash gareynaysid annagoo eegi doona biilasha iyo rasiidkaba.

Arrintaani wax saamayn ah ma ku yeelanaysaa gunnooyinka aan hadda qaato?
Maya. Gunnooyinka wax is beddel ahi ku imaan mayaan. Miisaaniyaddaada gaarka ah waxaa loogu talogalay inaad ku bixisid daryeelka iyo taageerada aad u baahan tahay. Ma aha dakhli gaar ah, laguna tirin mayo dakhliyada marka la xisaabayo canshuurta iyo gunnooyinka.

Waxaan ka welwlesanahay in anigoo waxaan oo dhan doortay aan dhibaatada u sii nuglaan doono. Sidee ayaan ammaankayga ku sugayaa?
Ammaankaagu aad iyo aad buu muhiim u yahay. Iyadoo qayb ka ah qorshahaaga daryeelka iyo taageerada, ayaan aad ula socon doonaa wax kasta oo aan u aragno inuu halis kuu keeni karo, waynuna ka wada hadli doonaa sida loo yaraynayo wixii halis ah oo jira.

Haddii aad dareentid inuu jiro qof taagdarradaada ka faaiideysanaya waa inaad u sheegtaa hawlwadeenkaaga daryeelka ama Kooxda Fayodhowrka Qaangaarka ee Degmada (Council's Adults Safeguarding Team). Macluumaadka arrimahaan ku saabsan oo dhammi waxay ahaanayaan kuwo qarsoodi ah oo la dhowro.

Kooxda Fayodhowrka Qaangaarka ee Degmada waxaad kala xiriiri kartaa telefoonka 020 8356 5782 ama email adultprotection@hackney.gov.uk

Maxaa dhacaya haddii horay lacagta toos la iigu soo shubi jiray (Direct Payment)?
Nidaamka cusub ayaad raaci doontaa. Nidaamkaani wuxuu ku siin doonaa habab kala duwan oo aad adeegga ku heli doontid.

Aniga ayaa qof daryeela. Sidee ayay arrintaani ii saamayn doontaa?
Qiimeynta waxaa ka mid ah su'aal ku saabsan daryeelaha. Wixii taageero ah oo daryeeluhu bixiyo waa in lagu daraa qorshaha taageerada, kaasoo ka muuqan doona miisaaniyadda gaarka ah.

Maxaan filan karaa?
Daryeele ahaan, waxaad xaq u leedahay in lagu qiimeeyo iyo weliba in lagaa qaybgeliyo qiimeynta qofka aad daryeeshid. Aragtidaada, fikradahaaga iyo himilooyinkaagu waa lagamamaarmaan. Waxaad filan kartaa in xornimo lagu siiyo inaad kala dooratid waqtiga, nooca iyo inta uu le'ekaanayo daryeelka aad bixinaysid.

Haddii qofka aad daryeelaysid uu xaq u leeyahay taageero joogto ah oo uu doorto in miisaaniyaddiisa gaar loo siiyo, waxaad qofkaas la diyaarin kartaa qorshihiisa guud iyo sida uu lacagtiisa u istcmaalayo.

Si aad wax badan uga ogaatid adeegyada hadda la heli heli karo ka wac Khadka Gargaarka ee Daryeelayaasha (Carers' Helpline) telefoonka 020 8356 5054 (oo furan Isn-Jim 8am-8pm, Sab 9am-1pm) ama email u dir carers@hackney.gov.uk

Sidoo kale waxaad si toos ah ugu lug-yeelan kartaa is beddellada lagu samaynayo daryeelka bulshada qaangaarka ah marka aad ku soo biirtid kooxda talo-bixinta daryeelka ee Hawlwadaaggga Sinnaanta Degmada. Si aad ugu biirtid wac 020 8356 2721.

Ma rabtaa inaad wax badan ogaatid?
Si aad wax badan uga ogaatid sida uu isu beddelayo daryeelka bulshada qaangaarka ah, oo ay ku jiraan macluumaad luqado iyo qaabab kala duwan ku qoran:

Wac	020 8356 6262
Email	trasc@hackney.gov.uk
Booqo	www.hackney.gov.uk/trasc
Warqad u dir	Your care, your way, Freepost LON18819 Room 82, Hackney Town Hall London E8 1EA